# Waxaa kula soo xiriirtay hay'adda deyn ururinta oo ka shaqeysa ScottishPower waxayna kaala soo xiriirtay haraagga lacagta aan la bixin

## Waxa ay tahay inaad hadda sameyso

Fadlan si toos ah ula hadal hay'adda deyn ururinta, faahfaahinta xiriirkooda waxay ku jiri doontaa warqadda ama farriinta ay kuu soo direen. Waxay kuu ogolaanayaan inaad LanguageLine u isticmaasho sida adeegga turjumaadda taleefanka haddii aad u baahato.

## Maxaa dhacaya haddii aadan la xiriirin.

Waxaa muhiim ah inaad ogaato waxa ay yihiin tallaabooyinka xiga ee koontadaada haddii aadan la xiriirin hay'adda deyn ururinta si aad u bixiso ama ugala hadasho qorshaha lacag bixinta ee ku habboon. Haddii aadan la xiriirin, waxaa laga yaabaa inaan:

- Soo booqano gurigaaga

  Waxaa laga yaabaa inaan gurigaaga u soo dirno qof si uu kaagala hadlo xaaladdaada. Iyada oo qayb ka ah booqashada, duubista maqalka iyo muuqaalka kamaradda jirka lagu xirto ayaa la samayn karaa. Tani waa si loo ilaaliyo xuquuqdaada iyo in la xaqiijiyo nabadgelyadaada. Duubista waxaa loo keydiyaa si ammaan ah waxaana lala wadaagi karaa Ofgem (jaangooyaha tamarta) waxaana la hayn doonaa ilaa shan sano.

  Dhammaan duubista waxaa loo isticmaali doonaa ujeeddooyinkan kor ku xusan waxaana loo kaydin doonaa si ammaan ah. Waxaa noo yaala sharci ah in aan baabi'inno macluumaadka shakhsiyeed marka aan mar dambe loo baahnayn.

  Haddii ka dib, booqashadan koontada aan la bixin ama aan la helin qorshe lacag bixineed, waxaan tixgelin doonnaa haddii Pay As You Go ay tahay hab lacag bixin oo ku habboon qoyskaaga. Haddii aan u aragno inay kugu habboon tahay, markaa waxaan ku sii socon karnaa sida soo socota.

- Inaan mitirkaaga casriga ah u bedelno Pay As You Go

  Haddii aad haysato mitirka casriga ah, waxaan khadka ka beddeli karnaa qaabka/nooca mitirkaaga si lacag bixinta looga dhigo Pay As You Go iyadoon lagaa qaadan wax ogolaansho ah.

- Inaan codsano amar aan ku soo galno gurigaaga.

  Haddii aadan haysan mitirka casriga ah, waxaan ka codsan karnaa maxkamadda amar sida ku xusan Xuquuqda Gelitaanka (Guddiyada Gaaska iyo Korontada) 1954 kaas oo na siin doona xaq u lahaanshaha inaan galno gurigaaga si aan ugu rakibno mitirka lacag bixinta si lacag bixintaada looga dhigo Pay As You Go.

## Maxaa dhacaya haddii aan helno Amar Gelitaanka Guriga

Haddii maxkamaddu ay na siiso amar, waxaan gurigaaga ku geli karnaa ogolaansho la'aan ama adiga oo aan ogolaansho ka bixinin inaan ku rakibno mitirka lacag bixinta nooca Pay As You Go.

Haddii aadan guriga joogin, waxaa laga yaabaa inaan u baahano inaan qasabno gelitaanka gurigaaga, taas oo waxyeello geysan karta, sidaa darteed noo oggolaanshaha inaan galno ayaa kuu fudud. Wixii markaas ka dambeeya waxaan sugi doonaa gurigaaga, haddii loo baahdo, waan beddeli doonnaa qufulada.

Tamartaada/korontadaada ayaa la demin doonaa ilaa muddo gaaban inta lagu rakibayo mitirka. Tani waxay qaadan kartaa ilaa saacad iyo badh.
Waa inaan kuu sheegno, ScottishPower ayaa kaa qaadi doonta kharashka tallaabada maxkamadda iyo waaranka booqashada. Tani waxay kharash ahaan kugu keeni doontaa ilaa £ 150

### Sida Ay U Shaqeyso Lacag Bixinta Pay As You Go

Waxaad lacag ku shubanaysaa mitirkaaga si aad u bixiso gaaskaaga iyo korontada ka hor intaadan isticmaalin. Waxay u shaqeysaa sida lacag ku shubashada taleefanka gacanta-waxaad lacag ku shubaysaa mitirkaaga tamarta, lacagtaasna waxay bixinaysaa isticmaalkaaga tamarta.

Mitirkaaga ayaa loo dejin doonaa qaab uu u goosanayo haraaga lacagta lagugu leeyahay - taasi waxaa loogu yeeraa qiimaha lacag bixintaada. Qaddarka aad ku shubayso miitirka ayaa dabooli doona isticmaalkaaga tamarta joogtada ah oo lagu daray caddad lacageed oo aad iskaga bixinayso haraaga lacagta lagugu leeyahay. Waxaan had iyo jeer isku dayi doonnaa inaan ku heshiinno qiimaha lacagta dib u bixinta ee adiga kugu habboon oo waan kaala hadli doonaa arrintan. Haddii aadan guriga joogin marka aan rakibayno mitirka, waxaan dejin doonnaa qiimaha lacag bixinta caadiga ah waadna nala soo xiriiri kartaa si aad u bedelno.

### Waa inaad hadda noo sheegtaa haddii aad u maleyneyso in Lacag Bixinta nooca Pay As You Go aysan kugu habboonayn

Haddii aad u maleyneyso in qoyskaagu uusan awoodin inuu isticmaalo mitir lacag bixintiisu ay tahay qaabka Pay As You Go, fadlan noo soo sheeg. Pay As You Go waxay si fiican ugu shaqeysaa dad badan maxaa yeelay waxay ka caawisaa miisaaniyad u samaynta kharashka tamarta, laakiin kuma habboona qof walba. Tusaale ahaan, haddii qof gurigaaga jooga uu qabo dhibaatooyin caafimaad, uu u baahan yahay tamar joogto ah ama baahiyo kale oo gaar ah, noo soo sheeg. Waxaan xaqiijin doonnaa inaan tixgelinno xaaladdaada.

Fadlan la soco sida aan horeba kuugu sheegnay, waxaa laga yaabaa in qiimaha lagu daro lacag si ay kaaga caawiso iska bixinta haraaga lacagta lagugu leeyahay. Fadlan hubi bayaankaaga si aad u hesho wixii faahfaahin dheeraad ah.

### Waxa ay tahay inaad samayso haddii aad u maleyneyso in deyntan kugu taagan aan adiga kugu habboonayn

Haddii aad tahay kireyste cusub ama milkiilaha guriga oo hadda u soo guuray gurigaaga cusub oo aad u maleyneyso in haraaga taagan aan adiga ku khuseyn, fadlan noo soo sheeg sida ugu dhakhsaha badan. Waxaad u baahan doontaa inaad muujiso caddeyn taariikhda guuritaankaaga, sida heshiiska kirada ama warqad qareen ah oo xaqiijinaysa inaad dhawaan iibsatay guriga. Fadlan caddeyntaas u dhiib hay'adda ururinta deynta.

## Caawimaad iyo taageero dheeraad ah

## Sida la noola soo xiriiro haddii luuqadda Ingiriiska uusan ahayn afkaaga koowaad?

Haddii Ingiriisku uusan ahayn afkaaga koowaad, waxaan ku siin karnaa turjubaan luqado badan oo kala duwan si ay kaaga caawiyaan inaad ka hadasho koontadaada tamarta, waxaan LanguageLine u isticmaalnaa arrintan.
Si fudud u wac **0345 270 0700**, Isniinta ilaa Jimcaha 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo oo weydii LanguageLine.

## Caawimaad iyo taageero ku aadan lacag bixintaada

Haddii aad u baahan tahay caawimaad, waxaa jira siyaabo kala duwan oo Scottish Power, iyo ururo kale
ay kuu caawin karaan.

Waxaan:

- ku siin karnaa siyaabo kala duwan oo aad ku bixiso lacagta sida inaad lacag bixinta u kala qaybiso Dhibitka Tooska ah ama la xiriirida Waaxda Shaqada iyo Hawlgabka (DWP) si aad u qorshayso inaad lacagaha Shidaalka Tooska ah si toos ah uga bixiso gunnooyinkaaga.

- kaa caawin karnaa inaad yareyso kharashka tamartaada iyadoo isbeddello fudud lagu samaynayo caadooyinkaaga isticmaalka tamarta. Wax badan ka baro boggayaga waxtarka tamarta ee **scottishpower.co.uk/energy-efficiency** ama qaar ka mid ah talooyin faa'iido leh ka hel **energysavingtrust.org.uk**

- kugu dari karnaa Diiwaanka Adeegyada Mudnaanta haddii aad u baahan tahay taageero dheeraad ah sabab la xiriirta naafonimo ama xanuun daba-dheeraaday ama aad gaartay da'da hawlgabnimada. Laga soo bilaabo akhriska mitirka ilaa hubinta badbaadada gaaska, biilasha ay fududahay in la akhriyo, ogeysiintahawlwadeenka shabakadda tamarta haddii aad u baahan tahay koronto joogto ah, intaas dhan PSR-kayaga ayaa kaa caawin kara. Wax badan ka ogow **scottishpower.co.uk/psr**

- kugu hagaajin karnaa StepChange kuwaas oo bixiya talo deyn oo madax-bannaan oo bilaash ah. Waxaad sidoo kale booqan kartaa **stepchange.org** ama ka wici kartaa **0800 138 1111.** Waxay sidoo kale ku siin karaan faahfaahin ku saabsan Sanduuqa/Deeqda Dhibaatada ee ScottishPower kaas oo ka caawiya macaamiisha u qalma ee dakhligoodu hooseeyo si ay u yareeyaan haraaga lacagta lagu leeyahay. Wax badan ka ogow **scottishpower.co.uk/fund** ama waxaad ka wici kartaa **0121 285 2595**

Citizens Advice waxay bixin kartaa talo bilaash ah oo dhexdhexaad ah; Waxaad websaydkooda ka boogan kartaa **citizensadvice.org.uk/energy.** Gudaha England iyo Wales, waxaad Citizens Advice kala xiriiri kartaa khadka caawinta macaamiisha **0808 223 1133**. Khadka ku hadalka luuqadda Welsh, lambarka waa **0808 223 1144**. Gudaha Scotland, waxaad Advice Direct Scotland kala xiriiri kartaa **0808 196 8660** ama **Energyadvice.scot**

## Waa kuwan qaar ka mid ah su'aalaha inta badan la isweydiiyo iyo jawaabahooda, haddii laguu wareejiyay ama horey laguugu wareejiyey Pay As You Go

**Sida qaabka lacag bixinta ee Pay As You Go U Shaqeyso:**

- Waxaad lacag ku shubanaysaa mitirkaaga adigoo adeegsanaya kaar, fure ama ablikeeshin.
- Lacagta aad ku shubto, waxay noqoneysaa kiridhit kuugu jira mitirkaaga.
- Markaad isticmaasho gaaska ama korontada, mitirku wuxuu lacag ka goosanayaa kiridhityadaada
- Marka kiridhitka ku jira miitirka ay yeraato, waxaad u baahan doontaa inaad mar kale ku shubato si aad u sii waddo isticmaalka tamartaada.

**Faa'iidooyinka Qaabka Lacag Bixinta ee Pay As You Go:**

- Adiga ayaa go'aansanaya inta aad isticmaalayso.
- Waxay kaa caawineysaa inaad miisaaniyad u sameyso isticmaalka tamartaada.
- Lama kulmaysid biilasha tamarta ee lama filaanka ah - maxaa yeelay waxaad hordhac u bixisaa lacagta tamarta.

### Waa maxay lacag ku shubasho oo sidee ayaan u sameeyaa?

"Lacag ku shubasho" waxay kuu ogolaanaysaa inaad lacag ku shubto mitirkaaga gaaska iyo/ama korontada. Waxaad ku shubi kartaa lacagta adigoo adeegsanaya app-ka ama adigoo booqanaya goobta. Tani waxay kuu ogolaaneysaa inaad si fudud u maamusho kharashkaaga tamarta oo aad ku shubato wax yar xitaa £ 1, mar kasta oo aad u baahato.

- Haddii aad isticmaalayso **Miitirka Lacagtiisa Hordhaca Loo Bixiyo ee Asalka ah**Waxaad u baahan tahay inaad ku shubato lacagta adigoo aadaya Post Office,Payzone, ama PayPoint.
- Markaad haysato**mitirka lacag bixinta hordhaca ah ee casriga ah,**waxaad lacagta ku shuban kartaa adigoo tagaya goobahaas ama adigoo isticmaalaya-Ablikeeshinka ScottishPower.

### Sideen ku ogaan karaa goorta ay tahay inaan lacag ku shubto?

Shaashadda Gudaha Guriga Ku Rakiban ayaa kuu digi doonta marka kiridhitkaaga mitirka ay ka hoos marto £ 1. Waxay samayn doontaa dhawaaqoo shaashadda ayaa iftiimi doonta. Haddii kiridhitkaaga uu hoos maro £ 1, Shaashadda Gudaha Guriga Ku Rakiban ayaa muujin doonta inaad isticmaali kartokiridhitka xaaladaha degdegga ah Haddii aadan haysan IHD, mitirkaaga ayaa soo muujin doona marka kiridhitkaaga uu yeraado waxaadna sidoo kale awoodi doontaa inaad isticmaasho kiridhitka xaaladha degdegga iyada oo loo marayo mitirka.

**Goorma ayaa haraaga lacagta la igu leeyahay la cusbooneysiin doonaa ka dib markaan lacagta ku shubo?**

- **Haddii aad lacag ku shubashada ka samayso dukaanka:** Mitirkaaga ayaa si otomaatig ah isku cusbooneysiin doona
- **Haddii aad samayso lacag ku shubashada adoo adeegsanaya app-ka:** waxay qaadan kartaa ilaa 1 saac in la cusbooneysiiyo. Haddii aan la cusbooneysiin, waxaad gacanta ku gelin kartaa lambarka Macaamilka Ganacsi ee Gaarka ah (UTRN) ee

mitirkaaga ama IHD. Waxaad heleysaa UTRN mar kasta oo aad samayso lacag ku shubasho.

### Maxaa dhacaya haddii aanan lacag ku shuban?

Haddii aadan lacag ku shuban, gaaskaaga iyo/ama korontadaada ayaa la damin karaa. Ka dib marka aan kuu rakibno mitirkaaga, waxaan ku siin doonnaa tilmaamo cad oo ku saabsan sida lacagta loogu shubto. Maadaama wakiilka soo booqanaya gurigaaga uu kuu sharxi karo wax walba, waxaanan isticmaali karnaa adeegga turjumaadda haddii loo baahdo.

### Xaggee baan ka baran karaa wax badan oo ku saabsan qaabka lacag bixinta ee Pay As You Go?

Waxaad wax badan ka baran kartaa **scottishpower.co.uk/payg**

### Maxaan sameeyaa haddii aanan awoodin inaan lacagta ku shubto?

Mitirkaaga lacag bixinta kama jarmi doonto sahayda (korontada/gaaska) habeenkii ama maalmaha dhammaadka usbuuca. Mitirkaaga sidoo kale wuxuu leeyahay £ 10 oo kiridhitka xaaladaha degdegga ah. Haddii aad wax cillado ah la kulantid, fadlan nala soo xiriir **0345 270 0700**, Isniinta ilaa Jimcaha 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo oo codso LanguageLine, haddii aad u baahan tahay adeeggan.

Haddii ay jirto sabab aadan lacag ugu shuban karin mitirkaaga, sabab la xiriirta in qaabka lacag bixinta Pay As You Go aysan ku habboonayn qoyskaaga, fadlan noo soo sheeg. Tusaale ahaan, haddii qof gurigaaga jooga uu qabo dhibaatooyin caafimaad, u baahan yahay tamar joogto ah ama baahiyo kale oo gaar ah, waxaan dib u eegi doonnaa haddii Pay As You Go ay kuu shaqaynayso. Haddii loo baahdo, waxaan kaala hadli karnaa hababka kale ee lacag bixinta.